

# WAXQABADKA WIILASHA IYO DHALINYARADA RAGGA MIDABKA LEH EE MAGAALADA OO DHAN JEBINTA CAQABADAHA IYO HORUMARINTA HOGAAMIYEYAASHA

## SHURUUDAHA KA QEYB QAADASHADA GOLAHA HOGAANKA DHALINYARADA (YLC)

### Waa maxay Gohala Hogaanka Dhalinyarada ee Wiilasha iyo Dhalinyarada Ragga Midabka leh?

Waa guddi ka kooban 100 Wiilal iyo Dhalinyara Ragga Midab leh (sida kuwa madowga iyo kuwa kale aan cadaan ahayn) ee deggan soonaha magaalada Buffalo si codka dhalinyarada kor loogu qaado iyo in la xoojiyo loona hagaajiyo nolasha dhalinyarada ragga ah ee midabka leh. Golaha waxuu ka shaqeyn doonaa sharciyada, nidaamyada, iyo sheekooyinka saameynta ku leh wiilasha iyo dhalinyarada ragga ah ee midabka leh. Dhalinyarada xubnaha ka ah golaha waxay fursad u heli doonaan in ay ka sheekeeyaan sheekadooda iyo inay ka faa'ideystaan fursadaha hoggaaminta.

### Hadafyada Golaha Hogaaminta Dhalinyarada

- ❖ Kor u qaadida codka dhalinyarada
- ❖ Wax ka badalidda sheekooyinka la xiriiro Wiilasha iyo Dhalinyarada Ragga Midabka leh
- ❖ Fahamka iyo saameynta sharuucda iyo nidaamyada saameeynayo Wiilasha iyo Dhalinyarada Ragga Midabka leh
- ❖ U sameynta fursadaha hoggaaminta dhalinyarada
- ❖ Awood u siinta dhalinyarada ragga ah inay noqdaan hoggaamiyeyaal wanaag u horseedo bulshadooda
- ❖ Hagaajinta xirfadaha dhageysiga iyo bandhigga
- ❖ Ka taageeridda dhalinyarada ragga ah sidii ay u yeelan lahaayeen xiriiro iyo shabakada caawiyo

### Rajooyinka

- ❖ Kasoo qeygalidda hal (1) shir oo afar saacadood qaadanayo bishiiba mar oo lagu qabanaayo xarumaha Iskoolada Bulshada Dadweynaha Buffalo ee soo socdo:
  - Bennett – 2885 Main Street, Buffalo, NY 14214
  - East – 820 Northampton Street, Buffalo, NY 14211
  - Lafayette – 370 Lafayette Avenue, Buffalo, NY 14213
  - South Park – 150 Southside Parkway, Buffalo, NY 14220
- ❖ Ka qeyb qaadashada fursadaha hoggaaminta
- ❖ Ka qeyb qaadashada mashaariicda intarneetka warbaahinta bulshada
- ❖ Bixinta jawaab celinta iyo talooyinka lagu hagaajinaayo Golaha Hogaanka Dhalinyarada
- ❖ Barashada xirfadaha iyo aqoonta inta lagu jiro mudada adeega
- ❖ Qoridda ka qeyb qaatayaasha Golaha Hoggaanka Dhalinyarada sanadka 2018-2019

### Shuruudaha U Qalmitaanka

- ❖ Soo buuxi soona gudbi waraaqaha codsiga ugu dambayn Sabtida, Disembar 9, 2017
- ❖ In la dhamaystiro wareysiga haddii lagu soo xusho
- ❖ Waa inuu jiro ugu yaraan da'da 12-24 sano (waalidka waa inuu u saxiixo qofkii ka yar 18 sano jir)
- ❖ Dhalinyaro iskoolka dhigta iyo kuwa aan iskool dhiganin
- ❖ Waa inuu ku noolyahay soonaha magaalada Buffalo
- ❖ Inuu ballan qaado inuu saameyn wanaagsan ku yeelan doona bulshadiisa